

Marxaladda 2aad ee u Furan Qorshaha Xagaaga oo bilaabmaya 10-ka Juun

Juun 09, 2021

Alberta waxay qaadi doontaa talaabo weyn oo ku wajahan sidii ay si nabad ah ugu soo noqon laheyd sidii caadiga ahayd ee xarumaha jirdhiska, maktabadaha iyo tiyaatarada filimada oo dib loo furey isla markaana dib loo bilaabi doono kulamada waaweyn ee banaanka.

Laga bilaabo 10ka Juun, Marxaladda 2aad ee u Furan Qorshaha Xagaaga ayaa dhaqan geli doona, laba toddobaad kadib markii 60 boqolkiiba dadka reer Alberta ee da'doodu tahay 12 iyo wixii kaweyn ay heleen ugu yaraan hal qiyaas oo tallaah ah iyo isbitaal dhigidda KOOFID-19 oo aad uga hooseeya 500 oo welina hoos dhacaysa.

Saraakiisha ayaa sii wadi doona inay kormeeraan horumarka bixinta tallaalka Alberta iyadoo ay il gaar ah ku hayaan tirooyinka isbitaal dhigidda iyo gudbinta KOOFID-19 ee gobolka.

Xayiraadaha ayaa la fududeeyay Marxaladdan 2aad ee u Furan Qorshaha Xagaaga, laga bilaabo 19 ka Juun.

- Isku imaanshaha bulshada ee bannaanka waxay u kordhayaan 20 qof, iyadoo la kala fogaanayo.
- Xafladaha arooska ee gudaha iyo bannaanka ayaa soo imaan kara ilaa 20 qof. Soo dhoweynta banaanka waa la ogol yahay.
- Adeegyada aaska ee gudaha iyo dibaddaba isma beddelayaan iyadoo la oggol yahay ilaa 20 qof. Soo dhoweynta banaanka waa la ogol yahay.
- Makhaayadaha waxay miiskiiba fariisin karaan illaa lix qof, gudaha iyo dibaddaba.
 - Xaflaha uma xadidin qoysaska oo keliya.
 - Kala fogaanshaha jirka iyo xaddidaadaha kale wali wey jiraan.
- Tirada dadka ee goobaha tafaariiqda waxay u kordhaysaa saddex meelood hal meel xeerka degganaanshaha dabka.
- Tirada goobaha cibaadada waxay u kordheysaa saddex meelood meel ee xeerka degganaanshaha dabka.
- Goobaha Jimicsiyada gudaha ayaa u furan dadka kaligood ah iyo in la yimaad balan la'aan iyadoo leh seddex mitir oo u kala fog ka qaybgalayaasha iyo fasallada jirdhiska ayaa dib u bilaabi kara isu jirsanaya dadka saddex mitir marka ay howlahooda ku jiraan.
- Goobaha gudaha waxaa laga yaabaa inay ku furmaan ilaa saddex meelood hal meel ee xeerka degganaanta dabka, oo ay ku jiraan xarumaha madadaalada ee gudaha. Tan waxaa ka mid ah fagaarayaasha, shineemooyinka, tiyaatarada, matxafyada, qolalka farshaxanka iyo maktabadaha.
- Howlaha Isbortiga dhalinyarada iyo dadka waaweyn ee dibedda iyo gudaha oo dib u bilaabmay.

- Waxqabadyada dhalinyarada, sida xerooyinka maalinlaha ah, xeryaha habeenkii iyo xarumaha lagu ciyaaro, dib ayay u bilaabi karaan.
- Adeegyada gaarka ah iyo faydaqabka ayaa dib u bilaabi kara balan la'aan.
- Machadyada dugsiga sare waxay dib u bilaabi karaan waxbarashada.
- Amarka ka shaqeynta guriga waa la qaaday laakiin wali waa lagu talinayaa.
- Xarumaha fadhiga go'an ee banaanka ah (tusaale ahaan, tarabuunka) waxay ku furi karaan seddex meelood meel oo fadhi ah.
- Isku imaatinada banaanka ee dadweynaha waxay u kordhayaan 150 qof (tusaale, riwaayadaha/xafladaha).

Xirashada af xirka gudaha iyo shuruudaha kala fogaanshaha way sii jireysaa inta lagu jiro Marxaladda 2aad. Xaddidaadaha qaar ayaa sii jiraya inay ku dhaqmaan waxqabadyada ku dhex jira tallaabo kasta.

Marxaladda 3aad ayaa la filayaa inay bilaabato dhammaadka Juun ama horraanta Luulyo. Tani waxay ku tiirsan tahay dhammaan dadka reer Alberta oo sii wadaya tallaalka iyo raacidda tallaabooyinka caafimaadka dadweynaha ee jira.

Dadka reer Alberta waxay kala socon karaan horumarka talaalka gobolka ee alberta.ca.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyadoo ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka oo ay tilaabooyin sax ah u mareyso, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

Xog la xariirta

- Alberta ayaa u furan Qorshaha Xagaaga ([Alberta's Open for Summer Plan](#))
- Xogta KOOFID-19 ee loogu talagalay reer Alberta ([COVID-19 info for Albertans](#))

Weydiimaha warbaahinta

[Jerrica Goodwin](#)

587-988-3278

Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Premier

[Tom McMillan](#)

780-422-4905Kaaliyaha

Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

Si aad u hesho ilo badan oo dowladda loo turjumay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.